




MAAHMAAHYO Murti & Madadaallo



Sheekooyinka Hiddaha & Dhaqanka



MAAHMAAHYO Murti & Madadaallo



Sheekooyinka Hiddaha & Dhaqanka

Waxaa Qoray
C/casiis Cali Ibrahim "Xildhiban"
LONDON 2007

Xildhiban Publications

Tel: +44 (0) 7984 329 891

Email:
xildhiban@hotmail.com
xildhiban@yahoo.co.uk

First Edition August 2007
LONDON

ISBN: 0-9549555-1-X

All rights reserved; No parts of this publication may be reproduced, stored in a retrieval system, or transmitted in any form or by any means, electronic, mechanical, photocopying, recording or otherwise, without the prior permission of the copyright owner.

Xuquuqda Daabacaaddu waxay u keydsan tahay Qoraha Buuggan. Qeyb ka mid lama daabacan karo, lama foto-koobiyeyn karo, lama duubi karo idanka qoraha buuggan la'aantiis.



Waxaa lagu daabacay magaalada London ee dalka Ingiriiska.

Copyright©Xildhiban 2007

All rights reserved

Wixii faahfaahin ah oo ku saabsan buuggan waxaad kala soo xiriiri kartaan:-

For information contact:-

Xildhiban Publications
London 2007

Abdulaziz Ali Ibrahim
"Xildhiban"

Tel: +44 (0) 798 432 9891

Email
xildhiban@hotmail.com
xildhiban@yahoo.co.uk

Typeset/Design/Print & Bound by;

Xildhiban Publications
9White House , Clapham Park Estate
Headlam Road , London
SW4 8HD

TUSMO

Tusmada buugga

Hordhac.....	5
Dalka Jamhuuriyadda Soomaaliya	6
Waa maxay Maahmaahyadu?.....	7
Hibeyn.....	8
Mahadcelin ballaaran.....	9
" Maahmaahooyin.....	10
" Maahmaahyo reer Xamar.....	51
" Maahmaahooyin "Maay maay ah".....	52
" Maahmaahooyin cusub.....	53
" Labaleey.....	61
" Saddexleey.....	62
" Afarleey.....	80
" Shanleey.....	81
“ Todobaleey.....	82
" Googaa Cadalleysi.....	83
" Xikmado.....	84
" Ila Qosol.....	85
" Fuleygii Caqliga badnaa iyo sheekooyinkiisii.....	88
" Halxiraalayaal.....	90
" Magacyada Xayawaanka ku nool dalka Soomaaliya.....	91
" Baro Gobollada iyo Degmooyinka dalka Soomaaliya.....	92
" Dhererka u dhaxeeya gobollada dalka Soomaaliya.....	96
" Fogaanta u dhaxeysa Magaalooyinka Soomaaliya.....	96
" Nolosha reer miyiga.....	97
" Hiddo dhaqanka Soomaalida.....	102
" Qalabka Hidaha iyo Dhaqanka Soomaalida.....	106
" Xoolaha laga helo dalka Soomaaliya.....	108
" Noocyada lacagaha laga isticmaalay Soomaaliya.....	116
" Lacagihii ay dalka keentay dowladiid Cali Mahdi.....	121
" Muuqaallada lacagta Somaliland.....	122
" Lacagaha been abuurka ah ee dalka la soo galiyay.....	123
" Muuqaallada lacagihii Shilling, Nus shilling, Kumi.....	124
" Taallooyinkii ugu caansanaa Soomaaliya.....	127

Dalka Jamhuuriyadda Soomaaliya

Dalka Jamhuuriyadda Soomaaliya waxay ku yaal dhinaca qorax ka soo baxa dhulweynaha Geeska Afrika. Waqooyiga waxaa ka xiga Gacanka Cadmeed, dhinaca Bari waxaa ka xiga Badweynta Hindiya, dhinaca Koofureedna dalka Kenya, dhinaca Galbeed waxaa ka xiga dalka Itoobiya.

Soomaaliya waxaa mara labo webi kuwaas oo kala ah Jubba iyo Shabelle, iyadoo wabiyadan ay soo dhexmaraan xuduudaha Soomaaliya ay la leedahay dalka Itoobiya.

Labadan webi waxaa aad u weyn kan Jubba oo dhererkiisa lagu qiyaaso in uu yahay ama dhulka uu maro ilaa 1500 KM, iyadoo webiga Jubba ka soo gala dhinaca gobolka Gedo, halka kan Shabelle uu isna ka yimaado gobolka Hiiraan.

Soomaaliya waxay leedahay xeebta ugu dheer dalalka ku yaalla Afrika, marka laga reebo dalka South Afrika. caasimadda dalka Soomaaliyana waa magaalada Muqdisho.

Dhulkii uu gumeystuhu qeybiyay ee Soomaaliya, qeybtii ugu horreysay ee Waqooyiga Soomaaliya waxay madaxbannaani qaadatay 26kii bishii Juun sanadkii 1960-kii, halka qeybtii Koofureed ay iyana madaxbannaanideeda heshay 1-dii Luulyo sanadkii 1960-kii, isla markaana ay midoobeen labadii gobo lee Waqooyi iyo Koofur, sameeyenna magaca Jamhuuriyadda Soomaaliya.

Waa maxay Maahmaahyadu?

Maahmaahyadu waa qeyb ka mid suugaanta Soomaalida kana kooban tixo xambaarsan xikmado, marmarna qeexan, marmarna maldahan. Intooda badan lama yaqaan cidda marisay iyo waqtiyadii la sameeyay.

Inta badan maahmaahyada Soomaalida waxaa loo isticmaalaa soo gaabinta ujeedada hadalka la doonayo in la xikmadeeyo, waxaa inta badan isticmaala dadka yaqaanna dhaqanka ma guuraanka ah ee Soomaalida, iyadoo dhaqanyaqaannadu adeegsanaya waayo aragnimadooda.

Waxayse mushkiladda ugu badan soo wajahday dhallinyarada qurba joogta ah ee ka tagay dhaqankii iyo caadooyinkii ay lahaayeen dadka ay aftirsiiyo ahaan ka soo jeedaan ee Soomaaliya, iyadoo maanta la arki karo xigmad beelka ku dhacay afkeeni hooyo mar haddii ay gabaabsi noqdeen isticmaalkii fara badnaa ee maahmaahyada Soomaalida. Maahmaahyada waxaa lagu tilmaamaa udub dhaxaadka hab dhaqan ee dhaqanka Soomaalida.

Hibeyn

Buuggan waxaan u hibeeyay dhammaan ubadka Soomaaliyeed ee ku dhaqan daafaha dunidan aynu ku noolnahay.

Haddaba Buuggani waxay carruurta Soomaaliyeed iyo da' dhaxaalkuba ka faa'iideysan doonaan dhammaan Murtida, Maadda iyo Madadaalada uu xambaarsan yahay buuggani.

Waxaan dhamamantiin idiin rajeynayaa in aad ka faa'iideysan doontaan buuggan aan idinkugu talagalay. Haddaba waxaan idinka codsanayaa in aad ku dadaashaan aqrintiisa, annigoo filaya in aad wax badan ka kororsan doontaan.



Qoraha Buuggan
C/casiis Cali Ibrahim "Xildhiban"

Mahad Celin

Waxaa mahad iska leh Allihii na abuurtay, waxaa ku dayasho mudan Nebi Muxamed "NNKH". Waxaan mahad ballaaran u dirayaa mahadi haka gaarto'e dhammaan axsaabteyda oo aanan halkan magacyadooda ku soo koobi karin.

Marka xiga waxaan si gaar ah ugu mahadcelinayaa marwo Naima Cali Xussein, oo iyadna igu gacan siiyay garaacidda, sixitaanka weeraha afka Soomaaliga iyo soo saarista Buuggan, la'aanteedna aysan suurtagal noqdeen soo bixitaankiisa.

Sidoo kale waxaan u mahadcelinayaa Abwaan Cali Axmed Raabi oo loo yaqaano "Cali Seeno", oo isna qeyb libaax leh ka qaatay, isla markaana ah hal abuuraha tiro kale oo ku cusub maahmaahyada Soomaalida, oo aad ku arki doontaan isla buuggan, isagoo kaga jeeday in hal abuurkoodu aaney aheyn wax lala yaabo ama cirka ka soo degay, laakiin ay yihiin wax u bannaan qof kasta sameyntooda iyo hal abuurkooduba.

Sidoo kale waxaan u mahadcelinayaa C/raxmaan Ibraahim Max'ed "Kiimiko" & Daahir Abuukar "Midnimo" oo iyagana gacan aan yareyn ku lahaa qurxinta iyo tayeynta buuggan.

Sidoo kale waxaan u mahad celinayaa Max'ed Xussein Loolow oo isna suurtagaliyay helitaanka madbacadda lagu daabacay buuggan.

Ugu dambeyntii waxaan u mahadcelinayaa Faadumo Max'ed Jimcaale "Faanto" oo iyadna qaabeynta sheekooyinka gacan weyn iga siisay.

Eebaa mahad iska leh.